



Xeerka Anshaxaa ee Daryeelka Dadka Da'da ah

Xeerka Anshaxaa ee Daryeelka Dadka Da'da ah wuxuu sharxayaa sidaad u dhaqmaysid ee aad ula dhaqmaysid macaamiisha. Waxaa ka mid ah 8-deeda qodob ee hoose.



A.



Wax u samee si xushmad leh oo ku saabsan xuquuqda dadka xoriyad qowlkooda, go'aankooda iyo go'aan gaaridooda sida waafaqsan waxa laysku raacsan yahay iyo shuruucda.

B.



U dhaqan si aad dadka kula dhaqanto si qadarin iyo xushmad leh oo qiimeysa kala dumanaantooda.

C.



Ula dhaqan dadka si xushmad leh arimahooda gaarka ah.

D.



U bixi daryeelka, taageerada iyo adeegyada si amaan leh oo waxqabad leh, oo xirfad iyo taxadar leh.

E.



U dhaqan si sharaf leh, daacadnimo iyo hufnaan.

F.



Si dhakhso leh u qaad talaabooyinka aad ku soo sheegayo oo ka falceli waxyaalahaa aad saluugsan tahay ee ku saabsan arimaha laga yaabo inay saameyn doonaan tayada iyo amaanka daryeelka, adeegyada iyo taageerada.

G.



Bixi daryeel, taageero iyo adeegyo ka madax bannaan:

- dhammaan qaababka qalalaasaha, takoorida, dhiigmiirashada, dayacaada iyo waxyeelaynta iyo
- falkumada galmada.

H.



Qaad dhammaan tallaabooyinka macquulka ah si looga hortago oo looga jawaabo:

- dhammaan qaababka qalalaasaha, takoorida, dhiigmiirashada, dayacaada iyo waxyeelada iyo
- falkumada galmada.

Ogow wax intaas ka sii badan:

**Guddiga Amaanka iyo Tayada Daryeelka Dadka Da'da ah
(Aged Care Quality and Safety Commission)**

agedcarequality.gov.au/providers/code-conduct-aged-care-information-workers

